



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Juun 16, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS, hawl wadaagayaasha oo dhan
Ka socota: Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka
Ujeedada: Farriin ka socota ODDS: Waxaa lagugu martiqaaday kulan loogu talagalay taxanaha kulanka toddobaadlaha ah ee dhanka internet-ka 'webinar series' ee dabaaldega 32-guuradii ka soo wareegtay Xeerka Naafada Maraykanka

Fadlan fiiri martiqaadkan taxanaha kulanka dhanka internet-ka 'webinar series' ee aanu ka soo gudbinayno ee ka socda Oregon Disabilities Commission, Northwest ADA Center and Disability Rights Oregon. ODDS ayaa lagu matali doonaa hadalka la soo bandhigayo Luulyo 12 ee ay sameynayaan Maamulaha Qaybta Mashaariicda Gaarka ah ee Isku duwaha Employment First ee Gobolka Acacia McGuire Anderson.

Asxaabta Qaaliga ah,

Sida lagu dhawaaqay horraantii bishan, Oregon Disabilities Commission, Northwest ADA Center and Disability Rights Oregon waxay martigelin doonaan taxanaha kulanka dhanka internet-ka 'webinar series' ee Qado iyo Waxbarasho bisha Luulyo iyada oo la aqoonsanayo loona dabaaldegayo 32-guuradii ka soo wareegtay Xeerka Naafada Maraykanka.

Qof kasta oo daneynaya waa lagu martiqaadayaa kulamadani, kuwaasi oo bilaabmi doona laga bilaabo 11:30 subaxnimo ilaa 1 galabnimo. Wakhtiga Baasifiga maalmaha Talaadada ah ee bisha Luulyo oo dhan.

Waxaanu ku faraxsanahay in aanu ku dhawaaqno dadka sanadkani ka hadlaya taxanaha kulanka dhanka internet-ka 'webinar series', kuwaasi oo lagu soo doortay aqoontooda, waayo-aragnimadooda iyo wax u doodistooda ee bixinta adeegyo tayo oo loogu talagalay dadka qaba naafanimada.

Luulyo 5: Waqtiyada Adag iyo Khilaafaadyada - ADA iyo Saameynta Borotokoolka COVID-19

- **Emily Cooper**, Agaasimaha Sharciga ee Xuquuqda Naafada Oregon
- **Joannie Tang**, Qof wax u dooda
- **Tina Pinedo**, Agaasimaha Isgaarsiinta Xuquuqda Naafada Oregon

Luulyo 12: Shaqaale Yaraanta Dhanka Daryeel bixiyaha - Baahida aadka ah ee Macaamiisha u qabaan Adeegyada Guriga-Dhexdiisa

- **Acacia McGuire Anderson**, Adeegyada Naafanimada Korriinka ee Oregon ee Maamulaha Qaybta Mashaariicda Gaarka ah ee Isku duwaha Employment First ee Gobolka
- **Cheryl Miller**, Agaasimaha Sare ee Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon
- **Bhagavati**, Falanqaynta Adkeysiga Shaqaalaha Dadka Waayeelka iyo Naafada ah
- **Theresa Powell**, Adeegyada Bulshada ee Dadka Waayeelka iyo Naafada ah iyo Qaybta Taageerada Hawlgallada iyo Falanqaynta Siyaasadda
- **David Scott Vining**, Falanqaynta Barnaamijka Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon

Luulyo 19: Wax iskaga maleynta Halista ah - Fahamka Takoorka Dadka aan dhago qabin iyo Beddelaada Aragtida Ku saabsan Wada xiriirka

- **Chris Mortenson**, Khabiirka Shaqaaleysiinta ee Iskaashiyada Nolosha Bulshada
- **Joanna Wilson**, Qof wax u dooda
- **Korian "Koko" DeMont Thomas**, Maamulka Caafimaadka Oregon ee COVID-19 Qaybta Ka jawaabida iyo Ka soo kabashada iyo Helitaanka Hawlgallada iyo Falanqaynta Siyaasadda

Luulyo 26: Horumarka ay samaysay ADA - Waqtigii tegay, Ka la joogo iyo Mustaqbalka

- **Dr. James "Jim" Davis**, Qof wax u dooda

- **Max Brown**, Adeegyada Muddada Fog ee Dadka Waayeelka iyo Naafada ah iyo Qaybta Taageerada ee Hawlgallada iyo Falanqaynta Siyaasadda
- **Ray Petty**, Qareenka Qaranka

Fadlan hore isku sii diiwaangeli adiga oo adeegsanaya [bogga internet-ka dhacdada ee Zoom](#). Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan taxanaha ayaa lagu bixin doonaa [bogga internet-ka ee Dhacdada Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon ee ADA](#).

Kulamada waxaa heli kara dadka naafada ah waxaanu lagu turjumi doonaa Isbaanish. Muuqaal Qoraal la Socdo 'Captioning' iyo Turjubaanada Luqadda Dadka aan wax Maqli karin ayaa la bixin doonaa. Su'aalaha ku saabsan helitaanka, ama codsiga in wax la sii qorsheeyo, fadlan la xiriir OregonDisabilities.Commission@dhsosha.state.or.us.

Fadlan emailkani dadka la wadaag iyo warqadaha macluumaadka wata ee ku lifaaqan 'flyers'— kuwaasi oo ku qoran Ingiriisi, Isbaanish, Af-Ruushka, Soomaali and Vietnamese, si aad nooga caawiso sii gudbinta hadalka ee ku saabsan taxanahani qiimaha leh.

Waxaan rajeynaynaa in aan kugu aragno dhanka internet-ka ee loogu talagalay dhacdooyinka!

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.